

OGOW XUQUUQDAADA GURYAHA DADWEYNAHA

Xubintaada Baarlamaanka (MP) ee Greens ayaa halkan joogta si ay kuu taageertohaddii aad rabtid inaad joogtid gurigaaga oo aad u ilaalisid jaaliyadaada.

1. Kuma khasbanid inaad la hadashid Homes Victoria turjubaan ama sharci yaqaan.

Waxaad go'aansan kartaa haddii, sida iyo markaad la hadlaysid Homes Victoria | Waxaad dejin kartaa xeerarka. Ha dareemin caddaadis inaad wax sameysid aadan dooneynin.

Waxaad xaq u leedahay turjubaan | Haddii aad u baahan tahay mid, waxaad xaq u leedahay turjubaan kulan kasta oo aad la leedahay Homes Victoria. Haddii uusan joogin turjubaan, waxaad u sheegi kartaa Homes Victoria inay baxaan/ oo ay dib kuu soo wacaan oo ay balamiyaan kulan markay kuu heli karaan turjubaan adiga.

Waxaad xaq u leedahay qareen | Waxaad xaq u leedahay inaad hesho qofkaad dooneysid inuu kula joogo markaad la hadlaysid Homes Victoria. Tan waxaa ku jira saaxiibada, qoyska, dadka ku taageerada iyo /ama qareen. Waa inaad la hadashaa qareen ka hor intaadan la yeelan kulan Homes Victoria ama aadan saxiixin wax dukumiinti

Wixii ah tallo sharci oo qarsoon , bilaashna ah, la xirii Fitzroy Legal Service: (03) 9419 3744

ah.

2. Kuma khasbanid inaad aqbasho guriga lagu siinayo haddii uusan adiga kugu habooneyn.

Qaar ka mid ah degenayaasha guryaha dhaadheer waxaa loo soo jeediyey qaadashada guryo aan fulineynin baahidooda waxayna dareemayaan caddaadis inay ka aqbalaan guryaan Homes Victoria. Kuma khasbanid inaad guri ka aqbasho inuu kugu haboon yahay mooyaane adiga. Umana aha wax hagaagsan Homes Victoria inay ku caddaadiyaan ama kugu dedejiyaan saxiixida waxna.

Tusaale, kuma khasbanid inaad aqbashid guri ah guryaha *Guryaha Bulshada* haddii aad dooneysid inaad joogtid *guryaha Dawlada* (eeg xagga dambe ee warqadan ee ku saabsan kala duwanaanshaha kuwaan u dhaxeeya). Uma baahnid inaad aqbashid guri aad ugu yar qoyskaaga, lama isticmaali karo ama aad uga fog jaaliyadaada.

3. Uma baahnid inaad saxiixdid wax waraaqo ah isla maalintaad la kulmeysid Homes Victoria.

Haddii Homes Victoria ay ku siiso dukumiinti aad saxiixeyso, waxaad qaadan kartaa foomamka oo aad ka soo fakeri kartaa in gurigaasi kugu haboon yahay adiga. Waxaad raadin kartaa tallo sharci iyo taageero luuqadeed ka hor intaadan go'aansan inaad saxiixdo iyaga. Kuma khasbanid inaad wax saxiixdid adaan ku qanacsaneyn.

4. Waxaad ka sameyn kartaa cabasho wax kasta oo hanjabaad ah, dhibitaan ama dabeecad aan habooneyn.

Haddii aadan jeclaysan la macaamilkaaga Homes Victoria, waxaad u caban kartaa MP- gaaga xaafada (ku arag faahfaahinta xiriirka xagga dambe), qareenkaaga ama Ombudsman (03 9613 6222).

Haddii aadan ogolaan qorshaha dawlada, waxaan kugula talineynaa inaad qoraal u dirtid weydiimaha Baarlamaanka ee qorshahan ku saabsan.

Deganayaal badan oo guryaha dawlada , kuwa u dooda guryaha dawlada, xubnaha kale ee bulshada iyo naqshadeeyayaasha dhismayaahsa, ma rabaan dawladu inay burburiso 44 ka guri ee dhaadheer ee Victoria oo ay ku bedelaan gurayaha gaarka loo leeyahay badidooda.

Waa fududahay in qoraal la diro Greens kuna halkan ayey joogaan si ay kaaga caawiyaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah gal

gabrielledevietri.org.au/issue/make-a-submission-parliamentary-inquiry-into-the-demolition-of-public-housing/ ama nala soo xiriir adoo isticmaalaya faahfaahinta hoose.

Office of Gabrielle de Vietri

188-196 Gertrude St Fitzroy VIC 3065 gabrielle.divietri@parliament.vic.gov.au

(03) 9415 8901

Dadka sii badan ee u sheega Baarlamaanka in la joojiyo burburinta iyo guryo gaar loo leeyahay ka dhigida guryaha dhaadheer, waa siday ku dareemayaan caddaadis badan Xisbiga Shaqaaluhu oo ay ku joojinayo qorshihiisa.

Waa maxay ‘Bulsho vs ‘Jaaliyad vs guryaha‘dadweyne’?

Guriyeynta bulshada | Waa eray ay ku jiraan labaduba guriyeynta bulshada iyo dadweynaha.

Guryaha dadweynaha | Waa guriyeynta ay wada leedahay oo maamusho dawlada. Rentlajaarka waxaa lagu xaddeey boqolkiiba 25 dakhliga qoyska. Kireysigoodu aad iyo u yahay mid sugan oo wakhti dheer. **Qorshaha dawlada wuxuu doonayaa inuu dhammaan guryaha dadweynaha ee dhaadheer in lagu bedelo guryo gaar ah iyo guryaha bulshada. Badbaadinta guryaha dhaadheeri waa badbaadinta nidaam guriyeynta dadweynaha ee Victoria.**

Guryaha bulshada | guryaha waxaa iska leh ama maamula ururo aan faa'iido doon ahayn. Ijaarku guud ahaan waa ka sareeyaa guryaha dadweynaha, wuxuuna ku xaddidan yahay boqolkiiba 30 dakhliga qoyska iyo cidda bixineysa oo qaadaneysa caawimaada Kirada ee dawlada dhexe (CRA) ee ay helaan kireystayaasha. Kireysigu wuxuu u eg yahay mid wakhtigiisu gaaban yahay saa daraadeed kireysiguna sugnaantiisu way ka yar tahay. Tayada adeegu waxay aad ugu xiran tahay adeeg bixiyaha mar kastana uma eegaan wuxuu door bidayo kireystaha shakhsiga ahi. Guryaha bulshadu wuxuu u noqon karaa kuwo u wanaagsan dadka baahiyaha khaaska ah leh, laakiinse aad ayuu qaali u yahay, sugnaantiisu ka yar tahay oo marmarka qaarkood fursadiisa isbedbelku ay ka yar tahay gudyaha dadweynaha.